




# RAKIB OO KU BIIR KULANKA SUUM (ZOOM) ADOO U SII MARAYA CASUUMAD IIMAYL (EMAIL) AH "ABBAL KOMBYUUTAR" – APPLE COMPUTER


1

Fur fariinta iimaylka ee uu kuu soo diray shaqsiga kugu casuumay ka qeybgalka Kulanka Suum. Badhanka bidix ee mawska (mouse) hal mar guji xiriiriyaha buluugga ah ee hoosta ka xariiqan.




3

Soo dejintu waxay ka muuqan doontaa geeska midig ee sare ee shaashadda. Guji fallaarta dhanka hoose u jeedda si aad u daawato feylka soo dejinta.




2

Websaayt (Website) cusub ayaa soo muuqan doona kaas oo kaa caawinaya rakibidda barnaamijka Suum (Zoom). Guji ereyada **Soo deji iminka** si aad howsha u bilaawdo.




4

Laba jeer guji **Zoom.pkg** si aad u bilowdo rakibidda Suum.




## 5

Rakibidda Suum (Zoom) ayaa markaa furmi doonta. Rakibaha Suum(Zoom) ayaa kaaga baahan doona inaad gujiso **Sii wad** si aad ugu sii socoto nidaamka rakibidda. Xullo **Rakib** marka lagu siiyo ikhtiyaarka.




**Fiiro gaar ah:** Dadka Kombyuutarka isticmaala qaarkood, waxay sidoo kale u baahan karaan lambarkooda sirta ah (password) ee kumbuyuutarka si aad u oggolaato rakibidda.

Hadday sidaas tahay, qor lambarka sirta ah, ka dibna guji **Rakib. Barnaamijka.**



## 6

Guji **Xir** hal mar "rakibidii waa lagu guuleystay" ayaa ka muuqanaysa shaashadaada.



7

## Guji **Ku Guur Qashinka.**



Do you want to move the "Zoom" Installer to the Trash?

To keep this package in its current location, click Keep.

Keep

Move to Trash

9

## Guji **Oggolow.**


Do you want to allow this page to open "zoom.us"?

Cancel

Allow

8

Ku noqo fariintii iimaylka ee lagu soo diray si aad uga biirto Kulanka Suum( Zoom). badhanka bidix ee mawska (mouse) hal mar ku guji xiriiriyaha buluugga ah ee hoosta ka xariiqan, isla sidii aad u samaysay talaabadii kowaad.



10

Markaad gasho kulanka, daaqad "Muuqaal Fiidiyow ah" ayaa soo muuqan doonta. **Guji Kaga qayb gal Fiidiyow** waxaadna kulanka ku soo biiri doontaa fiidiyowgaaga oo daaran.

Join without Video

Join with Video

11

Kadib, hagitaan labaad ayaa soo muuqan doona, "Si aad u maqasho dadka kale fadlan ku soo biir codka ". Guji **Kaga qayb gal Codka Kumbuyuutarka** dabeedna Kulanka Suum ayaa bilaabmaya makarafoonkaaga oo daaran.

Join with Computer Audio

Test Speaker and Microphone

BOGGA 3 EE 3